

# Caymiska Caafimaadka Cusub ee Dadka Waaweyn

Laga bilaabo Janaayo 1, 2019, dad badan oo qaangaar ah oo ku nool Virginia ayaa heli karaan caymis caafimaad oo tayo leh, qiimo jaban iyo mid bilaash ah!

## 1. Waa Maxay Caymiska Caafimaadka Cusub ee Dadka Waaweyn?

Xeerarka Medicaid ayaa isbeddelay. Tani waxay ka dhigan tahay haddii aad Medicaid horey uga codsatay oo lagu diiday, in aad hadda xaq u yeelan kartid. Laga bilaabo Noofembar 1, 2018, dad badan ayaa codsan kara inay u qalmaan caymiska caafimaadka ee Medicaid. Faa'iidooyinka waxay bilaaban doonaan Janaayo 1, 2019.

Dadka ka shaqeeya tafaariiqda, dhismaha, daryeelka caruurta, dhiraynta, adeegga cuntada iyo shaqooyin kale oo badan oo aan bixin caymiska caafimaadka, ayaa hadda u qalmi karaan.

Caymiska caafimaad cusub ee dadka waaweyn waxay bixiyaan faa'iidooyin badan oo loogu talagalay qoysaska dakhligoodu yar yahay oo laga yaabo inaynan awoodin daryeel caafimaad.

## 2. Muxuu Daboolayaa?

Caymiska caafimaadka cusub wuxuu dadka waaweyn ka daboolayaa:

- Dhakhtar, Isbitaal iyo adeegyada xaaladda degdega ah
- Daawooyinka dhakhtarku qoro
- Adeegyada sheybaarka iyo raajada
- Hooyada iyo daryeelka dhallaanka cusub
- Adeegyada muddada dheer iyo taageerada
- Adeegyada caafimaadka guriga
- Adeegyada caafimaadka dabecadda ah oo ay ku jiraan qabatinka maandooriyaha iyo adeegyada daaweynta kabsashada
- Adeegyada dayactirka oo ay ka mid yihiin jirkal, shaqada iyo daaweynta hadalka
- Gaadiidka adeegyada Medicaid ay daboosho marka aynan jirin wax kale oo la heli karo
- Adeegyada qorsheynta qooyinka
- Qalabka caafimaadka iyo sahayda
- Adeegyada ka hortagga iyo caafimaad qabka iyo maareynta adeegyada cudurka raagay
- Iyo wax kale oo badan!

## 3. Yaa la cayminayaa?

Dadka waaweyn waxay xaq u yeelan karaan caymiska caafimaadka cusub haddii ay:

- Ku nool yihiin Virginia
- Da'doodu tahay 19 - 64 jir
- Aanan helin ama ay u qalmaan Medicare
- Buuxiyaan shuruudaha dakhliga, taas oo ku xiran cabbirka qoyska

## Xadka Dakhliga Caymiska ee Dadka Waawey (Guud ahaan)\*

Cabbirka Qoyska	Bishii	Sannadkii
1	\$1,482	\$17,775
2	\$2,004	\$24,040
3	\$2,526	\$30,305
4	\$3,048	\$36,570
5	\$3,570	\$42,836
6	\$4,092	\$49,101

\*Laga bilaabo Janaayo 13, 2021. Xaddidaadaha dakhliga ayaa la beddelayaa sannadkiiba

## 4. Sideen u codsadaa?

Waxaad u codsan kartaa caymiska caafimaadka mid ka mid ah siyaabaha soo socda:

- Ka wac Xarunta Wicitaanka Virginia halkan 1-855-242-8282. Turjubaanno ayaa la heli karaa. Our Wakiiladeenu waxay kugu xiri doonaan qof ku hadla luqadda aad door bidayso .
- Buuxi codsiga internetka ah halka (Caawinta Guud): [www.commonhelp.virginia.gov](http://www.commonhelp.virginia.gov)
- Buuxi codsiga online-ka ah ee Caymiska Caafimaadka ee Goobta suuqa: [www.healthcare.gov](http://www.healthcare.gov)
- Ku soo dir Emayl ama gee warqadda [codsiga](http://www.coverva.org) Waaxda Adeegyada Bulshada ee deegaankaaga

Liisaska dukumeentiyada aad u baahan tahay marka aad codsaneyso, booqo [www.coverva.org](http://www.coverva.org) oo riix bogga Codsiga.